



## Hawsha: Muwaadinka hadda ee Dugsiga Sare ee Roosevelt

Miyaad ku gudbi kari lahayd imtixaanka muwaadinimada Maraykanka? Waa laga yaabaa. Lagama yaabo. Su'aalaha qaar ayaa laga yaabaa in ay ka yaabiyaan dadka ku dhashay ama ku karay waddankan, waxaana hubaal ah in ay caqabad ku noqon karto dadka cusub. Taasi waa sababta ardayda Dugsiga Sare ee Roosevelt ay galbhooda Arbacada ugu bixiyaan in ay faahfaahinta iyo nidaamyada imtixaanka baraan in ka badan 50 muhaajiriin iyada oo la adeegsanayo Hawsha: Barnaamijka muwaadinka.

“Waalidiinteydu waa qaateen markii aan yaraa, aniguna ma caawin karayn iyaga,” ayay sheegtay Angela Gonzales, oo ah ardayad sanadkii saddexaad dhigata Roosevelt. “Sidaa daraadeed kani kaliya ma ahayn waa hab aan wax u baran karno ee laakiin waxaan isbeddel ku sameyn karaa bulshadayda aniga oo sameynaya wax aan jeclaan lahaa in aan u qabto waalidkayga.”

Hawsha: Muwaadinku wuxuu bilaabmay sagaal sano ka hor markii koox ka tirsan Kooxda ardayda Dugsiyada Sare ee Lincoln ay dooneen in ay ogaadaan qaab ay u isticmaalaan waxa ay barteen si ay u caawiyaan bulshada. Ardaydani waxay bilaabeen in ay fasalada muwaadinimada dadku ku baraan laba maktabadood oo ku yaala Degaanka Washington. Iyada oo markaasi ka dibna barnaamijka ku ballaartay afar goobood. Dugsiga Sare ee Roosevelt waa kan ugu cusub. Mid shanaad ayaa dayrtan ka bilaabmi doona Dugsiga Sare ee Reynolds ee ku yaala bariga Degaanka Multnomah.

Hawsha: Fasalka muwaadinku wuxuu siddeed toddobaad. Muhaajiriinta ka soo qayb galaa waxay bartaan macluumaadka looga baahan yahay in lagu gudbo the 100 su'aalood oo ah imtixaanka muwaadinimada. Waxay sidoo kale isla eegaan su'aalaha suurtagal ah ee la weydiin doono iyada oo ku saleysan jawaabhooda qoran ee ku yaala N-400, foomka muwaadin noqoshada. Codsadayaasha waxaa laga yaabaa in ay leeyihiin dhammaan aqoonta si ay ugu gudbaan imtixaanka, laakiin waxaa laga yaabaa in ay kedis ku noqdaan su'aalaha fool-ka-fool ahi.

Eva, oo ah ardayad da'deedu tahay bartamaha uga jirta 50-meeyo sano, waxay ku faraxsan tahay fasallada waxayna rajeynaysaa in noqoto muwaadin, sidii walaalkeed iyo walaasheed ay sameeyeen sanado ka hor.

“Waxaan ku jiraa fasalkan sababta oo ah waxaan sugayay fursadan si aan u helo taageerada aan u baahanahay,” ayay sheegtay. “Waxaan sameynayaa wax kasta oo aan awoodi karo in aan ku guuleysto fasalka oo aan shaqo wanaagsan qabto imtixaanka.”

Deanna Delgado, oo ah macallimad Luqadda Farshaxanka ka dhigta Roosevelt, ayaa gacan ka geystay keenista Hawsha: Muwaadinka dugsiga. Waxay rabtay in ay ardaydeeda siiso hab ay saameyn ugu yeeshaan waxa iyada iyo kuwo badan oo ka mid ah ardaydeeda ay u arkaan in ay yihiin wax khaldan oo laga aaminsan yahay muhaajiriinta.

“Halkii fasalka la iska fadhiyi lahaa oo laga baran lahaa waxa socda isla markaana la xanaaqasanaan lahaa, aan isbedel sameyno markaasi taasi waa sida ay u bilaabantay,” ayay sheegtay Delgado.

Delgado waxay la xiriirtay Jason Trombley, oo ka tirsan Hawsha: Ahna la taliyaha muwaadinka. Iyaga oo wadajira, waxay barnaamijka ku ballaariyeen bulshada Waqooyiga Portland.

Ardayda Roosevelt waxay fasalka wax ku baraan Ingiriisi iyo Isbaanish labadoodaba. Ardayda Lincoln waxay fasallada wax ku barayaan Mandarin Chinese, Carabi iyo Isbaanish, sidoo kale.

“Ardaydu waxay ku barayaan Ingiriisi iyo luqadaha hooyo, si ay u awoodaan in ay isticmaalaan dhammaan xirfadaha ay leeyihiin si ay u caawiyaan dadka kale,” ayuu sheegay Trombley. “Waa wax xiiso leh in la arko sida ay u horumartay marka la gaaro sanado badan.”

*-Pamela Jordan*